# Qeexitaanka Xuduuddaha Badda Soomaaliya: Hawl aan la Huri Doonin, Horaa Loo Qabtaa

**W/Q Cabdiraxmaan J. Kulmiye, PhD**

**Julay 11, 2013**

---

"Hasha meesha taal, nafluhu waa hundhurayaaye" Qolofley Shiddo

Ilaa iyo intii uu soo shaac baxay Heshiskii is Afgarad ee dhexmaray Dawladdii Ku Meel Gaarka (DKMG) iyo Dawladda Kenya, horraantii 2009, waxaa jiray olole aan kala go' lahayn oo lagu doonayo in lagu xadeeyo badda Soomaaliya. Hawshaan waxaa hormuud ka ah dawlado shisheeye iyo hay'ado caalamiya oo ku doodaya in Soomaaliya aysan lahayn xuduud badeed caalamku aqoonsan yahay; marka laga reebo dhul badeed ballaciisu yahay 12nm (maylka badda) oo kaliya, sidaas darteedna loo baahan yahay in hadda la xadeeyo si loogu aqoonsado aagagga kale ee Cahdiga UNCLOS (United Nations Convention on the Law of the Sea) qeexayo.

Hase yeeshee, bulshada Soomaaliyeed waxay taas u aragtay shirqool lagu doonayo in lagula wareego qeybo ka mid ah badda ama lagu baabi'inayo dambiyadii laga galay dalka muddadii burburka iyo dawlad la'aanta lagu jiray. Muddaas iyada ah, waxaa ku soo qamaamay badda boqolaal maraakiib kallumaysi oo si arxan darro ah, sharcigana ka baxsan u gurtay kheyraad badeedkii dalka. Waxaa kale oo iyana la xaqiijinayaa in si ula kac ah badda loogu shubay haraadiga warshadaha oo uu ku jiro kan niyuukliyeerka (radioactive waste).



Arrinta xadeyntu waxay keentay midnimo aan looga baran Soomaalida 22 sano ee la soo dhaafay, iyada oo qurbo-joog iyo guda-joog ba ay mowqif isku mid ah ka qaateen in aan wax xadeyn ah lagu samayn badda; qiime kasta ha ku kacdee. Degellada internetka iyo idaacadaha waxaa lagu soo bandhigay barnaamijyo, maqaallo iyo waraysiyo ka tarjumaya shucuurta dadweynaha iyo sida looga soo horjeedo arrintaan, laguna cambaaraynayo madaxda dawladda qaarkeed oo loo arkayey in ay qeyb ka yihiin ololohaan.

Si loo caddeeyo in ay badda Soomaaliya leedahay xuduudo sugan, waxaa boorka laga jafay Xeerka Badda iyo Dekedaha tirsigiisuna yahay 37 ee la xeeriyey 1972, xilli ay Dawladdii Kacaanku calan wallaynaysay, kaas oo si cad u muujinaya in dhul badeedka Soomaaliya ballac ahaan yahay 200nm.

Xildhibaannada Golaha Shacabka, oo ka duulaya qeylo dhaanta dadweynaha, ayaa marar badan ku guulaystay in ay is hortaagaan isku dayadaas qaarkood, iyaga oo markii ugu damabaysayna go'aamiyey in aan cidina ka hadli karin, shisheeye iyo sokeeye toona, arrimaha badda. Goor sii horreysayna, waxay waxba kama jiraan ka dhigeen Heshiiskii is Af Garad ee sida doqon ma garatada ah hoosta loogu geliyey DKMG.

Hase yeeshee, waxaad moodaa in laanta fulinta ee dawladihii kala dambeeyey aysan dhiilladaan la qabin bulshoweynta iyo xildhibaanadooda ama se ay ba aaminsan yihiin in ay


**Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved**

sax tahay in la xadeeyo badda, marka laga eego waraysiyadii ay bixiyeen wasiirradii Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda ee dawladii Madaxweyne Shiikh Shariif Shiikh Axmed, gaar ahaan labadii ugu dambeeyey ee wasaaraddaas soo maray. Wasiirradaasi waxa ay labaduba marar badan ka dhawaajiyeen inay ku guda jiraan hawshaas ayna adeegsanayaan khuburo shisheeye. Dhawaanna Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud wuxuu waraysi laga qaaday, mar uu tegay London (safarkiisii 1aad – bishii Feberaayo 2013), ku sheegay in ay bilaabeen hawshii xadeynta badda dibaddana ka keeneen nin takhasus u leh. Intaasna ugama harine, Madaxweynuhu wuxuu, khudbad qoraal ah oo uu u direy Kooxda Xariirka Arrimaha Burcad Badeedda Soomaaliyeed oo dhawaan ku shireysay New York, USA, ku sheegay in badda Soomaaliya ka kooban tahay seddex aag oo kala ah: Dhul Badeed (Territorial Sea) ballaciisu gaarayo 12nm, Aagga ku Dheggan (Contiguous Zone) oo leh ballac 24nm ah iyo Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah (Exclusive Economic Zone - EEZ) oo isna 200nm ah; qeexitaanka xuduudaha baddana ay dhawaan u gudbin doonaan Golaha Amaanka ee QM, iyaga oo u marinaya Safaaradda Soomaaliya ee New York . Madaxweynuhu wuxuu kaloo qoraalkiisa ku yiri "in uu ku faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo in aan leenahay xeerka 1988 [la soo saaray] oo naga dhigaya kuwo si buuxda ugu hoggaansan Cahdiga UNCLOS ee aan saxiixnay 1982, ayna dawladdii hore ee Soomaaliya dhaqan gelisay bishii Feberaayo 1989".

**Ma dadweynahaa cidla' ka diday mise hawsha dowladdu waddaan sax ahayn?**

Si aan jawaab ugu helo su'aashaan, waxaan maqaalkaan kooban ku soo bandhigayaa macluumaad la xiriira xadeynta badda iyo sababaha keenay in waqtigaan la joogo laga hadlo arrintaan dhiillada weyn ku abuurtay bulshada Soomaaliyeed; iyada oo ay jiraan hawlo badan oo loo arki karo in ay aad uga muhiimsan yihiin marka laga eego xaaladda adag ee uu waddanku ku jiro.

**War horta miyaan Soomaaliya baddeedu xadeysanayn?**

Xeerka Lambar 37 ee aan kor ku soo sheegay wuxuu dhigayaa in dhul badeedka Soomaaliya ballac ahaan yahay 200nm, kana bilowda madhayaca heerkiisa hoose (meesha biyahu ka tagaan xeebta markii ay baddu caarido). Hase yeeshee, waxaa xusid mudan in uusan Xeerku ka hadlayn soohdimo badeedka aan la wadaagno waddamada aan deriska nahay sida Kenya, Yemen iyo Jabuuti; lamana hayo khariidado ama dhigaallo qoraal ah oo muujinya xuduudahaasi baraha (*coordinates*) ay maraan ama jihooyinka ay abbaaraan. Sida qaalibka ah, marka waddan samaysto xad badeed cusub ama uu wax ka beddelo mid hore u jiray, waxuu u gudbiyaa macluumaadkaas Qarammada Midoobay (QM) oo iyana dhigta keydkeeda dukumentiyada. Ma cadda in khariidadahaas iyo qoraalladaas si ula kac ah looga saaray keydka dukumeentiyada ee QM iyo in aan markii horeba loo gudbin ama aan asalkaba la samayn.

Waxaan jeclahay in aan carrabka ku adkeeyo in aysan taas micnaheedu ahayn in aan la aqoon meelaha ay xuduudaha baddeennu maraan marka laga hadlayo soohdimaha aan la wadaagno waddamada aan jaarka nahay ee aan kor ku sheegay; maadaama ay jiraan xeerar caalami ah oo qeexaya sida ay noqonayaan xadadka noocaas oo kale ah. Badanaa xad badeedku wuxuu raacaa qaabka iyo jihada uu u socdo xad birriyeedka kala qeybiya labada waddan ee deriska ah, haddii aysan jirin jasiirad(o) ku aaddan jihada uu markaas abaarayo xuduudkaasi oo labada waddan midkood leeyahay, taas oo keeni karta in xadkii laga leexiyo (duwo) jihadii


Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

uu markii hore u socday. Haddii labada waddan ay wadaagaan bad u dhaxaysa, sida annaga iyo Yemen oo kale, isla markaasna ay baddaasi ka yar tahay ballac ahaan 400nm (oo ah ballaca labo EEZ), xuduud badeedkooda wuxuu noqonayaa xarriiq la mariyo kala barka baddooda (equidistance line).

**Ma Soomaaliyaa ugu horreysay dal sheegta dhul badeed ballaciisu yahay 200nm?**

Dabcan, Soomaaliya uguma horreyn waddan sheegta dhul badeed ballac ahaan ka weyn intii markaas caam ahaan lagu dhaqmayey. In ka badan Labaatan dawladood oo Afrikaan iyo Latin Ameerikaan u badan ayaa Soomaaliya uga horreyey arrintaan oo si nin tooxsi ah u sheegtay dhul badeed ka badan 12nm, iyaga oo ka faa'ideysanaya Cahdigii Dhul Badeedka iyo Aagga ku Dheggan ee 1958 (Convention on the Territorial Sea and Contiguous Zone 1958) oo arrin furan uga tagay su'aashii ku saabsanayd baaxadda dhul badeedka ay waddamada xeebaha lihi yeelanayaan. Waxaana tusaale ahaan loo soo qaadan karaa waddamada *Brazil,Chile*, *Ecuador*, *Peru*, *Sierra Leone iyo Uruguay* oo dhammaantood gaarsiiyey dhul badeedkooda ballac ahaan 200nm. Waxaa xusid mudan in waddamadaas dhamaantood, marka laga reebo Peru, ay saxiixeen, dhaqanna geliyeen Cahdiga UNCLOS isla markaasna sharciyadooda maxalliga ah waafijiyeen.

**Soomaaliya qeyb ma ka tahay shuruucda caalamiga ah ee khuseeya badaha?**

Toban sano ka dib markii la soo saaray Xeerka Lambar 37, waxaa 1982 adduunku isku raacay Cahdiga UNCLOS oo beddelay heshiisyo afar ah oo horey loo gaaray 1958. Cahdigaani wuxuu qeexayaa xuquuqda iyo masuuliyadaha ay waddamadu yeelanayaan ee ku aaddan isticmaalka badaha adduunka; wuxuu kaloo dejinayaa xeerarka hagaya ganacsiga, degaanka iyo maareynta khayraadka dabiiciga ah ee badda. Wuxuu sidoo kale tilmaamayaa ilaa toddoba aag badeed oo baaxad ahaan kala weyn, intooda badinina ay hoos yimaadaan maamulka waddamada xeebaha leh. Xuquuqda, awoodaha iyo masuuliyadaha ay waddamadaasi ku leeyihiin aagaggaasi way kala badan yihiin, waxayna hadba ku xiran yihiin masaafada ay aagaggu u jiraan birriga oo marba markii badweynta la sii aado, saamayntii waddanku waa sii yaraataa. Bal aan tusaale u soo qaadano seddexda aag badeed ee ugu muhiimsan:

a) Dhul Badeedka oo ah aagga kowaad ee birriga xiga, cabbirkiisuna yahay 12nm, waddanka xeebta lihi wuxuu ku leeyahay xuquuq iyo awoodo la mid ah kuwa uu ku leeyahay dhulkiisa birriga, haddii ay noqon lahayd hawada ka sarraysa, sagxadda badda iyo ciidda ka hoosaysa.

b) Aagga ku Dheggan oo ah kan ku sii xiga dhul badeedka, cabbirkisuna yahay 24nm, waddanka xeebta lihi wuxuu isticmaali karaa awoodaha loo baahan yahay si uu uga hor tago xad gudub ka dhan ah arrimaha la xiriira canshuur bixinta (customs), maaliyadda (fiscal), socdaalka (immigration) iyo xeerarka khuseeya faya dhowrka ee ka jira waddankaas. Si maraakiibta looga ilaaliyo meelaha raadadka qaddiimiga ah ama walxaha taariikhiga ah leh, waddanka xeebta lihi wuxuu u qaadan karaa ka rarista allaabadaas laga rarayo meelahaas in ay tahay sharci darro haddii aan oggolaansho laga haysan.


**Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved**

c) Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah (EEZ) cabbirkiisuna yahay 200nm, waddanka xeebta lihi wuxuu ku leeyahay:

- xuquuq qarannimo sida baarista, ka faa'ideysiga, dhowridda iyo maareynta khayraadka dabiiciga ah, ha ahaado noole ama ma-noole laga helo sagxadda badda, ciidda hoose, ama biyaha dhexdooda, iyo sidoo kale hawlaha ku aaddan ka faa'ideysiga dhaqaalaha aaggaan sida soo saaridda tamar laga dhaliyo biyaha, xiiska ama dabaysha.

- awood maamul asaasidda iyo isticmaalka jasiirado macmal ah, rakibaado, dhismayaal, baaris cilmi badeed, iyo dhawridda iyo ilaalinta degaanka badda.

- xuquuqda iyo masuuliyadaha kale ee hoos yimaada shuruucda caalamiga ah.

Soomaaliya waxay ka mid ahayd waddamadii ugu horreeyey oo markii Cahdiga UNCLOS lagu heshiiyeyba horey ka saxiixay 1982 (iyada oo aan wax shuruud ah ku xirin, wax gaws haysi [reservation] ahna ka muujin), waxay se dhaqan gelisay (ratified) sannadkii 1989. Nasiib darro se, dawladdii dhexe waxay burburtay iyada oo labadii sharci oo midna maxalliga ahaa midna caalamiga ahaa aan is waafajin oo aan kii horena raficin (repealed) kii dambana aan guriyeyn (domesticated). Taas micnaheedu waxaa weeye in waddanka ay luqunta ugu jiraan laba sharci - oo uu midna qeyb ka yahay midna uu isagu samaystay - oo is khilaafsan, aagag badeedyo kala duwanna qeexaya.

Ilaa hadda (2013), Cahdiga UNCLOS waxaa xubno ka ah dalal tiradoodu gaarayso 165 iyo Ururka Midowga Yurub. Hase yeeshee, waxaa iyana jira waddammo dhowr ah, oo Maraykanku ugu horreeyo intooda badanina lahayn bad oo weli ka caga jiidanaya inay saxiixaan, inkastoo qaarkood mabdi'iyan ay aqoonsan yihiin sharcinnimda Cahdigaas. Waxaa xusid mudan in Mareykanku uu sheegto aagag badeedyo ballac iyo macno ahaan la mid ah kuwa uu qeexayo UNCLOS, balse sababo kale ayuu u cuskadaa saxiix la'aantiisa. Ilaa hadda ma jiro waddan intuu saxiixay Cahdigaan, haddana iskaga baxay oo ka laabtay.

**Muxuu caalamku ka aamminsan yahay dhul badeedka Soomaaliya?**

Soomaaliya wakhtigii ay ku dhawaaqday dhul badeedkeedu inuu yahay 200nm, caalamku wuxuu qabay in baaxadda dhul badeedka waddamada xeebaha lihi uu ballac ahaan noqdo 12nm oo kaliya; sida laga garan karo tirada dalalkii ku dhaqmayey cabbirkaas dhammaadkii 1975 oo gaarayey 100. Sidaas darteed, sharcinnimada baaxadda dhul badeedka Soomaaliya waxuu ahaa mid mar walba doodi ka taagneyd; hase yeeshee ma jirin cid ku dhiirrata oo si cad u tiraahda "Soomaaliya ma leh xuduud badeed caalamku aqoonsan yahay oo ka badan 12nm", wixii ka horreeyey burburkii dawladda 1991, arrimahaan soo socda awgood:

1) Dagaalkii qaboobaa oo isku dheelli tirayey labadii quwadood ee adduunka ugu xoogga badnaa wakhtigaas (Midowgii Sufyeeti iyo Maraykanka) oo marba mid ay Soomaaliya jaal la hayad.

2) Soomaliya oo intii aan Ilaahay garabkeeda ka bixin lahayd, maqaam siyaasadeed iyo cudud militari oo ay ku daafacan kartay danaheeda.


**Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved**

3) Cahdiga UNCLOS oo aan si sharci ah u hawl gelin wixii ka horeeyey 1994, sidii shuruuddu ahayd, markaas oo uu waddankii 60 saxiixay.

Mar haddii dawladdii dhacday, arrimihii markii horeba looga gabbanayeyna ay meesha ka baxeen, waxaa lagu dhiirraday in si cad oo aan gabasho lahayn loo yiraahdo “Soomaaliya ma leh xuduud badeed la aqoonsan yahay oo aan ka ahayn dhul badeed gaaraya ballac ahaan 12nm”, maadaama aysan weli u qeexin xuduud badeedkeeda si waafaqsan sharciga caalamiga ah ee UNCLOS. Dhul badeedkaan 12nm ah ma ahan mid ay Soomaaliya iyadu qeexatay laakiin waa, sida lagu doodayo, kan ay sharci ahaan xaqa u leedahay, maadaama ay tahay waddan xeeb leh - ha sheegato ama yaysan sheegane. Aragtidaani ma ahan mid ku kooban dhowr dawladood oo laga yaabo in dadka qaarkiis u arkaan in ay dano gaar ah ka leeyihiin baddeenna, laakiin waa aragti caam ah oo xataa ay qabaan QM iyo Midowga Yurub (MY) sida qoraallo badan oo ka soo baxay xafiiyadooda kala duwan ay tilmaamayaan. Sida dad badani la socdaan, waxaa jira ciidammo ka socda MY (marka magacooda la soo gaabiyana loo yaqaan: EU-NAVFOR-ATALANTA) oo ka hawlgala biyaha Soomaaliya, waajibaadkooduna markii hore ku koobnaa la dagaallanka burcad badeedda oo kaliya balse mar dhexe loogu kordhieyey in ay ka hortagaan kalluumaysiga sharci darrada ah ee maraakiibta shisheeye ka wadaan baddeena. Ciidammadaan waxaa ilaa hadda laga la’yahay in ay gutaan waajibaadkooda ku aaddan kalluumaysiga sharci darrada ah, iyaga oo mar walba ku andacoonaya in aysan aqoon xuduudaha badda Soomaaliya wixii ka dambeeya 12nm.

Tuhunka la geliyey sharcinnimada xaduudaha badda Soomaaliya wuxuu keenay in ay baddii noqoto mid aan la kala xigin oo ciddii rabtaa ay ku samayso wixii ay doonto sida ka kalluumaysi sharci darro ah iyo ku aasid haraaga warshadaha. Dhibta lagu hayo baddu waxay abuurtay walaac weyn oo laga qabo cawaaqib xumada ka dhalan karta haddii aan si deg deg ah wax loog qaban, waana tan keentay in caalamku ku cadaadiyo madaxda dawladda Soomaaliya in ay u hawl galaan qeexitaanka xuduudaha badda si waafaqsan Cahdiga caalamiga ah ee UNCLOS.

Waxaa kale oo iyana culeyskeeda la timid hawl lagu muudaysnaa oo waddamada xeebaha leh looga rabay in ay toban sano gudahood (oo ku ekeyd 2009) kusoo gudbiyaan macluumaadka la xiriira sheegashadooda ku aaddan xuduudaha shishe ee sallaan qaaradeedkooda (continental shelf) ee ka dambeeya 200nm, sida ku cad qodobka 76 Cahdiga UNCLOS. Waddamada ka baaqsada soo gudbinta macluumaadka laga rabay waqtigaas la cayimay, lumin mayn xuquuqda ay ku leeyihiin sallaan qaaradeedkooda, laakiin waxay jebinayeen waajibaadkoodii kaga aaddanaa Cahdiga UNCLOS. Si aysan taasi u dhicin, waxaa la isla gartay in waddamada soo koraya, oo ay dabcan soomaaliyana ka mid tahay, oo aan soo dhammaystiri karin shuruudaha laga rabo oo dhan in ay kaga filan tahay uun soo gudbinta macluumaad hor dhac ah. Sida aan la wada soconno, ra’iisul wasaarihii hore, Cumar Cabdirashid, ayaa bishii April 2009 u gudbiyey macluumaad hor dhac ah guddiga QM u qaabilsan hawshaan. Dhammaystirka hawsha hartay ma ahan mid sahlan, kana sokow khubarada loo baahan yahay in ay u hawl galaan, waxay u baahan tahay kharash xad dhaaf ah oo uusan waddanku ka bixin karin wakhtigaan la joogo.

**Maxaa ku jaban haddii aan labada sharciba wada haysanno?**

Sida la garan karo labada sharci iskama feer shaqayn karaan, suurto galna ma ahan in laga noqdo Cahdiga caalamiga ah, waayo Soomaaliya waajib baa ka saaran in ay dhowrto, fuliso


**Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved**

oo welibana ku dhaqanto shuruucda caalamiga ah ee ay qeybta ka tahay. Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in sida ugu dhakhsaha badan loogu hawl galo sidii loo baabi'in lahaa Xeerka Lambar 37 loona soo saari lahaa xeer cusub oo qeexaya aaggaga iyo xuduudaha badeenna oo waafaqsan Cahdiga UNCLOS. Sharciga uu Madaxweynuhu ka sharqamiyey ma ahan mid ay ka war hayaan dadka arrimahaan u dhuun daloola ama kuwii ka hawl geli jirey wasaaradihii iyo wakalaadihii u xil saarnaa arrimaha badda. Sharcigaan waxaa jiritaankiisa la maqlay markuu soo baxay Heshiiskii Kampala 2010, koleyse cirka kama soo degin oo wakhtiga la leeyahay waa la xeeriyey (1988), waddanku wuxuu lahaa dawlad iyo gole shacab, xildhibaannadii waagaasna in badan baa nool oo weliba jooga waddanka kana markhaati kici kara jiritaankiisa. Haddii la caddeeyo inuu sax yahay lana hubiyo inuu waafaqsan yahay Cahdiga UNCLOS, looma baahna in sharci kale la soo saaro oo isagaa is waafajiyey, sida la filayo, labadii sharci - haddii aan la saluugayn qodobbada ku qoran qaarkood ama aan loo arag in wax ka dhimman yihiin.

Haddii aynaan ka tanaasulin Xeerka Lambar 37 iyo dhul badeedka uu qeexayo, waxaan luminaynaa dhammaan xuquuqda, awoodaha iyo masuuliyadaha aan ku leenahay baddeena oo uu Cahdiga UNCLOS noo oggolaanayo. Sidoo kale, waxaa meesha ka baxaya in aan sheegano xuduudaha shishe ee sallaan qaaradeedkeenna (continental shelf) ka dambeeya 200nm, waayo waddanka sheeganaya aaggaas, waa inuu marka hore qeyb ka yahay Cahdiga UNCLOS isla markaasna cayimaa xuduudaha baddiisa. Waxaa kaloo dhib lagala kulmayaa in la helo waddamo ama shirkado shisheeye oo diyaar u ah in ay maal gelin ku samaystaan baddeena si looga faa'ideysto kheyraadka ku jira (noocuu doono ha ahaadee); maadaama shuruudahooda ugu horreeya ay ka mid noqon karaan in marka hore baddu leedahay xuduudo qeexan oo adduunku aqoonsan yahay isla markaasna uu jiro xeer badeed maxalli ah oo waafaqsan sharciyada caalamiga ah. Waxaana intaas oo dhan ka daran waa dhibta uu shisheeyuhu ku hayo baddeenna (oo aan hadda laga difaaci karin xaaladaha jira awgood) oo aan marnaba joogsanayn ilaa inta sharcinnimada xuduudaha baddeena uu muranku ka taagan yahay. Sharci yaqaanno badan oo ku takhasusay qawaaniinta badda ayaa qaba in ay xataa adkaan karto in laga guulaysto gabood falayaasha dambiga ka galay badda Soomaaliya, haddiiba ay dhacdo in dacwad looga soo oogo Makamadda Caalamiga ee Cadaaladda horteeda.

**Sida hadda wax loo wado ma tahay sidii la rabay?**

Soomaalidu waxay ku maah maahdaa "hawl aan la huri doonin, horaa loo qabtaa", sideedana caqliga saliimka ahi ma oggola in laga war wareego ama dib loo dhigto hawl ku sugaysa oo aan marnaba laga fursanayn fulinteeda. Welibana kuma sii jirto haddii hawshaasi keeni karto dhibaatooyin aan laga soo waaqsan karin sida midda hadda uu shisheeyuhu ku hayo baddeena. Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in sida ugu dhakhsaha badan loogu guntado sidii loo qeexi lahaa xuduudaha baddeena iyada oo la diyaarinayo sharciyada, khariidadaha iyo qoraallada kale ee loo baahan yahay. Dabcan, hawshaan fulinteeda waxaa iska leh waajibna ka saran yahay madaxda dawladda oo runtii lagu ammaani karo in ay mar horeba garteen sida aan marnaba loo fursanayn in xuduudaha baddeena la waafajiyo Cahdiga caalamiga ah ee UNCLOS. Waxaase jira saluug weyn oo laga qabo sida ay u maaraynaynayaan fulinta hawshaan xasaasiga ah oo haddii aan si fiican loo maamulin, horseedi karta in si fudud lagu lumiyo qeybo aan yarayn oo badda ka mid ah.


Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

Saluuggaan badankiisa waxaa loo aanayn karaa wacyi gelin la'aan aan bulshada loo wacyi gelin sidii la rabay iyo laba codleynta madaxda dawladda oo marka ay dhageystayaashoodu yihiin shisheeyana si wax uga sheega, marka ay la hadlayaan bulshada Soomaaliyeedna si kale wax ugu sheega. Tusaale, sidaan aan hore u soo sheegnay, Madaxweynuhu waxuu dhageysteyaashiisii New York u sheegay in ay Soomaaliya leedahay seddex aag badeed, haddana lagu gudo jiro sidii loo qeexi laahaa xuduudaha baddeeda. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ahna Ra'isul Wasaare ku Xigeen, Marwo Fawsiya Xaaji Aadan waxay iyana la saxiixatay dhiggeeda dawladda Kenya (Ambasador Aamina Maxamed) heshiis, 31 Maajo 2013, qodobbadiisa uu ka mid ahaa qeexidda xad badeedka kala qeybiya labada waddan; inkasta oo ay mar dambe beenisay jiritaanka qoddobkaas. Iyaga oo malaha ka hor tagaya bulaan ka dhasha heshiiskaan cusub, golaha wasiirradu waxay, war saxaafadeed ay soo saareen 6 Juun 2013, ku sheegeen in Xukuummaddu ay aqoonsan tahay Xeerka Lambar 37 ee badda welibana ay ayidsan tahay go'aammadii uu barlamaanku ka gaaray arrimaha badda. Seddex beri ka dib war saxaafadeedkii golaha wasiiradda, Ra'isul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon, wuxuu, isagoo tixgelinaya soo jeeedinta Wasiirka Kheyraadka Dalka, u gudbiyey Guddoomiyaha Barlamaanka hindise sharciyeedka kalluumaysiga Soomaaliya 2013 oo qodobbadiisa qaar ka mid ahi tilmaamayaan seddex aag badeed oo ah kuwii uu Madaxwene Xasan Shiikh Maxamuud ku sheegay qoraalkiisii, waafaqsanna Cahdiga UNCLOS.

Haddaba, su'aasha meesha taali waxay tahay: miyaan madaxda dawladdu is ka war qabin? Mise, waxay san lahayn siyaasad mideysan oo ku aaddan hawsha ay gacanta ku hayaan?

Si haddaba bulshada looga saaro shakiga isla markaasna hawshu u noqoto mid ay Soomaalidu leedahay, fullinteedana gar wadeen ka tahay; waxaa loo baahan yahay in dawladdu caddayso mowqifkeeda, samaysana wacyi gelin ballaaran oo ay dadweynaha ugu sharraxayso hawsha la qabanayo waxa ay tahay iyo sababaha keenay in wakhtigaan xaadirka ah loo guntado fulinteeda. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in si deg deg loo dhiso guddi heer qaran oo hawsha la wareega, xubnihiisana ay ka mid yihiin dhammaan hey'adaha qaran ee ku shaqada leh arrimaha badda iyo khuburo Soomaaliyeed oo lagu soo xulo daacadnimoooda, waddaninimooda, iyo dabcan aqoontooda gaarka ah. Haddii ay dhacdo in loo baahdo gacan shisheeye, baahi aqooneed ama mid dhaqaale tay doonto ha keentee, waxba kuma jabna in la miciinsado waxaase muhiim ah in doorkoodu ku ekaado **oo kaliya** daboolidda baahidaas ee uusan noqon mid marna saamayn ku yeesha maareynta iyo hab socodka hawshaan oo ah mid Soomaalida u taal. Waana in ay dawladdu garowsataa in hawshaan fulinteedu ahayn mid uu qof kaliyihi ka bixi karo ama ba lagu aamini karo – aqoon iyo waayo aragnimo kasta ha lahaadee – horaana loo yiri "xagalo geel wax gunti la galiyo ka weyn!"

Waxaa kaloo muhiim ah in ay Soomaalidu ku baraarugsanaato in meelaha khataraha ugu weyni ka imaan karaan aysan ahayn ka tanaasulidda sheegashada dhul badeedka uu tilmaamayo Xeerka Lambar 37 (oo aan khasaare mooyee, faa'iido noogu jirin) ee ay yihiin sida loo qeexayo/xadeynayo soohdimo badeedka aan la wadaagno waddamada aan jaarka nahay, gaar ahaan marka la samaynayo khariidadaha iyo qoraallada kale ee la xiriira; waayo khalad yar oo dhacaa (il duuf ama ula kac kuu doono ha ku yimaadee) wuxuu sababi karaa in lagu waayo qeybo waaweyn oo ka mid ah baddeena. Sida aan la wada socdo, Kenya ma qarsan damaceeda gurracan ee ay ku doonayso in ay kula wareegto qeybo ka mid ah baddeena – tani waxay ku xusuusinaysaa "ku qabso, ku qadi meyside" ee astaan u noqotay


Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

dhul boobkii waddanka ka jirey waqtigii burburka. Waxaa iyana welwelkeeda leh sida loo abbaarayo xad badeedka aan la ***wadaagayno*** Yemen, gaar ahaan dhanka Jasiiradaha Suqaddara oo aan saas uga fogeyn Raas Caseyr oo haddii la yiraahdo ha loo tixgeliyo jasiiradahaas sidii waddan kale oo yeelanaya Aaggiisa Dhaqaalaha Gaarka (EEZ), waxaa imaanaysa in aan qeybsanno badda noo dhaxaysa, taas oo khasaare weyn noogu jiro - haddii aan sidaas aqbalno - teeda kalena la iskama indha tiri karo xaqiiqda jirta oo ah in Suqaddara uu waddan kale maamulo. Sidii labadaas arrimood oo is diidaya la isku waafajin lahaa, waa arrin u baahan xirfad diblumaasiyadeed iyo mid aqooneed. Sidoo kale, Gacanka Cadmeed waa in isna isha lagu hayaa, waayo Aaggeenna Dhaqaalaha Gaarka ah iyo kan Yemen waa is dhaafayaan (haddii qolo kastaa sheegato 200nm) maadaama uu gacanku aad buu uga yar ballac ahaan 400nm, sidaas darteedna waxaa lagama maarmaan noqonaysa in aan kala barano.

Cabdiraxmaan J. Kulmiye, PhD
Email: attiross@gmail.com

-------------------------

*Cabdiraxmaan waa talo bixiye madax bannaan, kuna takhasusay cilmiga badda*

Tixraac

1. Somali Democratic Republic (1972). Law on the Somali Territorial Sea and Ports, 1972.
2. United Nations Convention on the Law of the Sea (http://en.wikipedia.org)
   A. J. Kulmiye (2001). Militia VS Trawlers: Who is the Villain? The East African, July 9–15, 2001
3. T. Neumann and T. R. Salomon (2012) Fishing in Troubled Waters - Somalia's Maritime Zones and the Case for Reinterpretation. Insights Vol. 16, Issue 9. American Society of International Law.
4. C. H. Schofield (2008) 'Plundered Waters: Somalia's maritime resource insecurity', pp. 215- 241. In: T. Doyle and M. Risely (eds) Crucible for Survival: Environmental Security in the Indian Ocean Region, Rutgers University Press.


Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved